



# Warar & Qoraalo: Ciera Ellington iyo Eric Knox oo ka tirsan Benson, Aaron Deloney oo ka tirsan Grant oo helay abaalmarinada ee Gobolka oo Dhan

Abaalmarinada ayaa iska soo daba dhacayay marka la eego gabdhaha kubadda kolayga ee Dugsiga Sare ee Benson, kuwaasi oo bishii la soo dhaafay ku guulaysatay horyaalkoodii ugu horeeyay ee gobolka ee taariikhda inta uu jiray barnaamijku. Toddobaadkii la soo dhaafay, ciyaaryahan heer sare ah iyo tababaraha ka socda Techsters ayaa ku guuleystay kooxaha Gobolka oo Dhan ee Class 6A.

Ciyaartoyda sanadkii u dambeeyay dhigata Benson ee Ciera Ellington ayaa loo coddeeyay in ay tahay Ciyaaryahanada Sanadka, iyada oo tababaraha Eric Knox loo doortay in uu yahay Tababaraha Sanadka cod bixin ay u qaadeen tababarayaasha gobolku. Ellington ayaa abaalmarinta la wadaagtay ardayada ciyaartoyda ah ee sanadkii saddexaad dhigata Southridge ee Cameron Brink.

Aaron Deloney, oo ah arday ciyaartoy ah oo sanadkii u dambeeyay dhigta Grant, ayaa loo coddeeyay in uu yahay Ciyaaryahanka Sanadka ee kooxda wiilasha ee Class 6A.

[Kooxaha Gobolka oo Dhan](#) waxaa soo daabacay The Oregonian/OregonLive toddobaadkii hore horraantiisii, iyada oo ku guuleystayaasha abaalmarinta lagu daray Jimcihi.

Knox, oo u horseeday Techsters in ay gaaraan kaalinta kama dambeysta ah ee gobolka laba sano oo isku xigta, ayaa loo coddeeyay in uu yahay Tababaraha Sanadka ee sanadkii labaad ee isku xiga ee xilli-ciyaareedka. Ellington, oo ahaa ciyaartoy sanadkii la soo dhaafay helay magacaabista sharafta leh ee soo xulashadii Gobolka oo Dhan, ayaa kor u soo kacay oo heerka sare soo gaaray ka dib markii uu helay abaalmarinta Ciyaaryahanka Sanadka Naadiga Dugsiyada Ka Dhexeeya ee Portland iyada oo lagu doortay cod la isku raacay ee tartanka kooxaha oo dhan ka dib markii uu Benson u horseeday horyaalka gobolka.

Laba kala oo ka tirsan ciyaartoyda Benson ayaa helay aqoonsiga Gobolka oo Dhan: Tayler Lyday ayaa ahaa kooxdii labaad ee la soo xushay, iyada oo Makenzy Porter uu ahaa ciyaartoyda sharafta leh ee la magacaabay. Laba ciyaartoy oo ka socday Grant, Daryn Hickok iyo Schuyler Berry, ayaa sidoo kale loo xushay magacaabista sharafta leh.

Deloney wuxuu noqday ciyaartoydii labaad ee ka tirsan PIL ee muddo isku xigta hela Ciyaaryahanka Sanadka. Xulashadii sanadkii la soo dhaafay, Marcus Tsohonis oo ka tirsan Jefferson, ayaa mar kale ku celiyay oo noqday kooxda u horeysa ee la soo xusho.

Ciyaartoyda kale ee wiilasha ee PIL ee helay aqoonsiga Gobolka Oo Dhan waxay kala ahaayeen Ty Rankin oo ka tirsan Grant, kooxda labaad; iyo Keylin Vance iyo Nate Rawlins-Kibonge oo ka tirsan Jefferson, oo ahaa ciyaartoyda sharafta leh oo la magacaabay.

**Verselandia oo la qorsheeyay Abriil 25:** Verselandia, tartanka sanadlaho ah ee gabayga ee Portland ee loogu talagalay ardayda, waxaa la qaban doonaa Khamiista, Abriil 25 isaga oo ka dhacaya Hoolka Riwaayada Arlene Schnitzer kaasi oo bilaabmaya 7 galabnimo. Ku guuleystayaasha tartamada gabayga ee 10 dugsiyada sare ee PPS, oo ay weheliyan Parkrose iyo Gresham, ayaa tartami doona.

Tartanka waxaa laga qabtaa iyada oo la raacayo xeerarka u yaala tartamada gabayga ee qaranka, iyada oo ardayda looga baahan yahay in ay shaqadoodii asalka ahayd ku soo bandhigaan guddi garsooyaal ah iyo dhageystayaal goobta jooga hortooda iyada oo aan la isticmaalayn, waxyaabo gaar ah, dharka gaar ah oo la xiranayo ama muusik. Shanta arday ee keena dhibcaha u sareeya ayaa heli doona abaalmarino. Sanadkii la soo dhaafay, ardayada ka tirsan Dugsiga Sare ee Grant ee Lucina Drake, ayaa ku guuleysatay tartanka.

Tikidhada waqtii hore ayaa laga sii gadan [karaawebiste-ka Portland 5](#).

**Dhacdada waxaa wax lagaga ogaanayaa nacaybka:** Sidee buu nacaybku u saameeyaa carruurteena? Su'aasha ayaa laga doodi doonaa inta lagu jiro dhacdada Isninta, Abriil 22, ka dhacaysa Qolka Guddiga ee Xarunta Adeega Waxbarashada Blanchard. Dhacdada, oo ah mid u furan dadka oo dhan, waxay soconaysaa 4 ilaa 5:30 galabnimo, waxaana marti gelin doona Mashruuca Wada hadalka 'Conversation Project'.

Mashruuca Wada hadalka 'Conversation Project', oo ay gacanta ku hayso Oregon Humanities, wuxuu isku keenaa dadka reer Oregon si ay uga wada hadlaan -- kala duwanaanshaha, waxyaabaha la aaminsan yahay, iyo taariikhaha -- waxyaabo ku saabsan arrimaha iyo fikradaha muhiimka ah. Ujeedadu waa in dadka lagu xiro fikrado iyo midba midka kale, ee ma aha in lagu qasbo ajande ama in uu la yimaado heshiis.

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo [website-ka Oregon Humanities](#).

**Lincoln oo u dabaaldegay sanad-guuradii 150<sup>-aad</sup>:** Waxay ahayd meel ay ka buuxeen midabka guduudka iyo caddaanka iyada oo Dugsiga Sare ee Lincoln uu u dabaaldegay sanad-guuradii 150-aad Abriil 13 iyada oo ka dhacday Garoonka Viking Pavilion ee ku yaala Jaamacadda Gobolka Portland. Waxyaabaha ugu muhiimsanaa xafladdii sanad-guuradii boqol iyo kontonaad 'sesquicentennial' waxaa ka mid ahaa qof marti ah oo meesha ka hadlay oo ah Matt Groening, oo hore uga qalan jabiyyay dugsiga isla markaana ah abuuraha bandhiga noloshu ka muuqato ee muddada dheer socday ee "The Simpsons," iyo ardayga Lincoln ka qalin jabiyyay 1938-kii ee Frieda Gass Cohen, oo horkacayay dadka isaga oo soo bandhigay heesta halganka ee Lincoln oo xiiso leh.

Xafladda Weyn 'The Big Party' sida ay gala ugu yeertay, waxay ahayd dabaaldega waqtigii tegay, ka la joogo iyo mustaqablka Lincoln. Iyada oo la furay 1869, Lincoln waa dugsiga sare ee dadweynaha ee ugu da'da weyn Oregon waana mid ka mid ah kuwa ugu da'ada weyn ee ku yaala galbeedka Webiga Mississippi. Dhismaha hadda ee dugsiga waxaa la dhisay 1952, waxaana la bilaabi doonaa mashruuca dhismaha oo weyn si loo casriyeeyo kaasi oo bilaabmaya xagaaga 2020.

Fiiри sawirrada muuqaalka Groening ee isku imaatinka ardayda Lincoln

Fiiри sawirro ka socda gala